

**FAAFIN**  
**الرسمية**



**RASMI AH**  
**الجريدة**

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA  
جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad

Muqdisho, 25 Abriil 1975

L. 2, R. 4

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xaafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

**KOOBNIIN**

**BOGGA KOWAAD**

**S H A R C I**

SHARCI L. 32 ee 10 Abriil 1975 — *Heshiis ku saabsan Magdhaw.*

Bog. 386 Bis

LEGGE N. 32 del 10 Aprile 1975 — *L'accordo nella forma dello cambio.*

» 387 Bis

**BOGGA LABAAD**

**X E E R**

W. M.

**BOGGA SEDDAXAD**

**TALOOPYIN ISGARSIIN OGEYSIIS WIXII LA MID AH**

W. M.

- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30 Maarso  
1975, L. 70 — *Dhul Dowladeed la siiyay gacantana loo*  
*geliyay Jaalle Jamiila Cali Bin Cali.* » 405

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOPYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 12 Abbril 1975, —  
*Beddelaad Naado Dhul, Amina Sheekh Xusen.* (68) Bog. 407
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16 Abbril 1975, —  
*Naada Dhul, Maxamed Warsama Rooble iyo Cali Jiisow*  
*Nuur.* (69) » 407
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16 Abbril 1975, —  
*Naada Dhul, Uluma Xasan Maxamed.* (70) » 408
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16 Abbril 1975, —  
*Beddelaad Naada Dhul, Axmed Maxamed Ibrahim.* (71) » 408
- SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI - SOPRAL - S.p.A.  
29 Abbril 1975, — *Avviso di Convocazione di Assem-*  
*blea Ordinaria.* (72) » 409
- WASAARADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED (I.C.S. -  
S.p.A.) 30 Abbril 1975 — *Ogeysiis Shir.* (73) » 409
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4 Maajio 1975,  
*Lumidda Buugga L. 96-4 Shs. 502 uu leyahay — Cab-*  
*dullahi Ismaciil Jaamac.* (74) » 410
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1 Maajio 1975,  
*Buugga lacagta L. 6478-4, Shs. 3.000, uu leyahay —*  
*Xusen Shire Jimcaale.* (75) » 410

## **BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI L. 32 ee 10 Abriil 1975.**  
**MEEL MARIN.**

### **GUDDOONSHAHA**

#### **GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**ISAGOO EEGAY** Warqadii Koowaad iyo tii abaad ee Kacaanka;

**ISAGOO DEHGEYSTAY** Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

**ISAOGO TIXGELINAYA** Uuajeeddadii ku qoreyd Aftiyadii ay is — dhaafsa — deen taariikhdi 21kii Maarso, 1973. Danjiraha Jamhuuriyadda Talyaaniga u fadhiya Mogadiscio iyo Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya.

#### **WUXUU SOO SAARAY SHARCIGA SOO SOCDA**

##### **Qodobka 1aad**

Heshiiska ku saabsan Magdhawda khasaarihii soo gaaray dadkii deganaa dauka Soomaliya waqtigii ay Ciidamada Ingriisku qabsadeen Soomaaliya, kuna qoraa Aftiyadii ay isku dhaafsadeen Magaalada Muqdisho taariikhdi 21kii Maarso 1973, wuu meel maray.

##### **Qodobka 2aad**

Heshiisku wuxuu dhaqan gelayaa waqtiga ku qoran Qodobka u dambeeya ee Aftiyada, kuwaasoo halkan ku lifaaqan ayagoo ka mid ah Sharcigan.

##### **Qodobka 3aad**

Sharcigani wuxuu yeelan doonaa astaan sharci. wuxuuna ka mid noqon doonaa sharciyada u degsan dalka isagoo lagu soo saari doono Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10 Abriil 1975.

**GUDDOONSHAHA**  
**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

X.g.: Aftiga lagu tilmaamany qod. 2aad ee Sharciga kor ku qoran lam. 32 ee 10.4.1975 waxaa laga helayaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

LEGGE N. 32 del 10 Aprile 1975.  
ACCORDO DI RATIFICA.

IL PRESIDENTE  
DEL CONSIGLIO RIVOLUZIONARIO SUPREMO

VISTO la Prima e la Seconda Carta della Rivoluzione del 21 Ottobre 1969;

SENTITO il Consiglio Rivoluzionario Supremo e il Consiglio dei Segretari di Stato;

CONSIDERATO il tenore delle Note scambiati in data 21 Marzo, 1973 tra l'Ambasciatore della Repubblica Italiana a Mogadiscio ed il Segretario di Stato agli Affari Esteri della Repubblica Democratica Somala;

PROMULGA LA SEGUENTE LEGGE:

Art. 1

S i ratifica u'accordo, nella forma dello scambio di Note, tra il Governo della Repubblica Democratica Somala ed il Governo della Repubblica Italiana, relativo alla definizione degli indennizzi dei danni causati ai residenti in Somalia dell'occupazione Militare Britannica, concluso a Mogadiscio il 21 Marzo, 1973.

Art. 2

Piena ed ntera esecuzione e' data all'accordo di cui all'Articolo precedente a decorrere dalla data della sua entrata in vigore, in conformita' della clausola finale delle Note stesse, allegate alla presente per farne parte integrante.

Art. 3

La presente Legge, munito del sigillo dello Stato, sarà pubblicata ed inserita nella raccolta ufficiale delle Leggi e dei Decreti della Repubblica Democratica Somala. E' fatto obbligo a chiunque spetti di osservarla e di farla osservare come legge dello Stato.

Mogadiscio, 10 Aprile 1975.

IL PRESIDENTE

del Consiglio Rivoluzionario Supremo

*Iqbal Moga, Gen. Mohamed Siad Barre*

## BOGGA KOWAAD SHARCI

SHARCI L. 33, Tr. 18 Jenayo 1975.

Calaamadaha Ganacsiga (Trade Marks and Patents).

### MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii labaad ee Kacaanka;  
ISAGO AQOONSAN Inay lagama maarmaan tahay in Jamhuuri-  
yada oo dhan lagu tixgelinyo sharci keliya oo ku saabsan calaamadaha  
ganacsiga;

ISAGO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo  
kan Xoghayeyaasha Dawladda;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

#### Qodobka 1aad

Sharciyadda lambarkoodu yihiin 1, 2 iyo 3 ee soo baxay 22-1-1955  
ee ku saabsan calaamadaha ganacsiga (Trade Marks and Patents) ee  
hadda ka hor looga dhaqmi jirey *dhinaca Koonfur* keliya waxay ka hir-  
geleyaan dalka Jamhuuriyadda oo dhan.

#### Qodobka 2aad

Waxa la tirtiray sharciyada hoos ku qoran oo ilaa hadda looga dha-  
qmi jiray *dhinaca* waqooyi keliya:

1. Sharci lamb. 9 ee soo baxay 6-8-1938 (United Kingdom Trade  
Marks Ordinance)
2. Sharci lamb. 9 ee soo baxay 13-11-1924 (United Kingdom Pa-  
tents Ordinance).
3. Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama khilaafsan sharciga kan.

#### Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa maalintii uu Madaxweynaha Go-  
laha Sare ee Kacaanku saxeexo, waxaana lagu soo saari doonaan Faa-  
finta Rasmiga ah.

Muqdisho, 18 Jenayo 1975.

SHARCI L. 34, Tr. 4 Maarso 1975.  
Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1975.

MAXDAWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
ISAGOO Go'aankii Labada Gola ee 20 Maarso, 1975;

Qodobka 1aad

Isbeddelka lagu sameeyey Miisaaniyadda sannadka 1975ka, sida ka muuqata lifaaqa A, waa la ogolaaday.

Qodobka 2aad

Xeerkanj wuxuu dhaqan-galayaa 21ka Maarso 1975, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada Dawladda Soomaaliyeed; waa in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. G. Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Maal.

*Jaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

MADAX	Madax-xige	TILMAAN	Oiyasitii hore	Isbeddelka	Oiyaa custu
1.2.0 Wasaaradda Maali- yadda	1.2.8 (kh) 1.2.8 (r) 2.2.0 (a)	Lacag Celin . . . Korsocodka Deynta . . . Deeqda Joogtada ah . . .	1.000.000 — 5.529.785 — 9.200.000 —	300.000 500.000 2.750.000	700 5.029 6.450
1.3.0 Wasaaradda Arrima- ha Dibedda	1.2.2 (t) 1.2.7 (j)	Qalabka baagoraalka . . . Qaadista saraayadda . . .	150.000 — 100.000 —	50.000 30.000	100 70
1.5.0 Wasaaradda Garsoor- ka «Maamulka»	1.2.5 (a)	Ijaar ka Guryaha . . .	70.000 —	30.000	40
1.6.1 Wasaaradda Arr. Gu- dha «Maamulka»	1.2.1 (t) 1.2.8. (kh)	Batoolka, nafada iyo saliidda Dugsiyada Heweenka . . .	250.000 — 50.000 —	40.000 10.000	210 40
1.7.0 Wasaaradda Hawlaha Gaud	1.2.2 (kh) 1.2.3 (t)	Qalabka sabanka . . . Alaabta darveehidda Guryaha . . .	120.000 — 3.200.000 —	20.000 200.000	100 3.000
1.8.0 Wasaaradda Macdan- ta iyo Biyaha	2.2.0 (a)	Kaalimada Wakaaladda Biyaha Abuurka nafaqada dhulka iyo sunta dul. . .	8.698.630 — 1.500.000 —	100.000 200.000	8.598 1.300.
1.9.0 Wasaaradda Beeraha	1.2.1. (a)	Sahniska . . . Iibsiga Matoorada Biyaha . . . Ijaar ka cagaf-cagafyada . . . Dhismaha biyo-merenka . . .	62.000 — 100.000 — 670.000 — 1.000.000 —	12.000 15.000 130.000 200.000	50. 85. 540. 800.

MADAX	Madax-xige	TILMAAN	Qiyaastii hore	Isbeddelka	Qiyaastii cusub
1.10.0	Wasaaradda Xanaana Xoolaha	1.2.1 (b) Daawada Xoolaha . . . . .	3.200.000	200.000	3.000.0
		1.2.2 (kh) Hantida yar yar . . . . .	100.000	25.000	75.0
		1.2.8 (j) Ballaarinta Hawlaha . . . . .	120.000	20.000	100.0
		1.2.8 (d) Hawlaha Xanaanada Xoolaha . . . . .	350.000	50.000	300.0
		2.1.0 (a) Laanta talaalka semeysa . . . . .	1.200.000	200.000	1.049.9
1.13.0	Wasaaradda Gaadiidka	1.2.2 (r) Iibka qalabka gegida dayuuradaha . . . . .	1.399.940	350.000	1.049.9
		3.1.1 (a) Dhismaha Hoosaha ee Xamar . . . . .	500.000	200.000	300.0
1.14.0	Wasaaradda Boostada iyo Isgarsiinta	1.2.1 (t) Batroolka, naftada iyo saliidda . . . . .	1.000.000	120.000	880.0
		3.1.1 (t) Kordhinta iyo ballaar. telf. Xamar . . . . .	1.368.000	368.000	1.000.0
1.15.0	Wasaaradda Ganaacs.	1.2.8 (j) Tababararka Shaqaalaha . . . . .	100.000	50.000	50.0
1.16.0	Wasaaradda Dalxiiska	1.2.2 (b) Qalabka badda . . . . .	150.000	50.000	100.0
		1.2.3 (b) Daryeelidda carshaanta . . . . .	150.000	50.000	100.0
		3.1.1 (a) Horumarinta xirmooyinka ugaarta . . . . .	500.000	100.000	400.0
1.17.0	Wasaaradda Waxbarashada	1.2.1 (b) Cuntada . . . . .	5.600.000	600.000	5.000.0
		1.2.1 (kh) Waxbaridda dadka waaweyn . . . . .	150.000	50.000	100.0
		1.2.2 (a) Sariraha iyo gogosha . . . . .	150.000	50.000	100.0
		1.2.2 (j) Qalabka waxbarashada iyo sayniska . . . . .	300.000	50.000	250.0
		1.2.6 (t) Khareshka beddelaadada . . . . .	250.000	50.000	200.0
1.18.0	Wasaaradda Hiddaha iyo T. Sare	2.2.0 (a) Gargaarka Jaamacadda Ummadda . . . . .	8.362.877	100.000	8.262.8



MADAX	Madax-xige	TILMAAN	Oiyasiti hore	Isbeddelka	Oiyasiti cusub
1.19.0 Wasaaradda Caafima- adka	1.2.2 (x)	Qalabka Isbitaalada	600.000	— 220.000	380.000
1.20.0 Wasaaradda Shagada iyo Isboortiga	1.2.8 (b) 2.2.0 (a) 2.2.0 (t)	Tababaraka Shagaalaha Lacagta Cayaraha Kordhinta Aqoonta Farsamayagaan.	150.000 250.000 100.000	— 50.000 — 50.000 50.000	100.000 200.000 50.000
1.21.0 Wasaaradda Warfaa- finta	1.2.1 (a) 1.2.1 (b) 1.2.3 (a) 1.2.8 (a) 2.2.0 (a)	Dharka Batroolka, nafada iyo saliidda Qalabka Idaacadda Kharashka dabaaldegga Wakaaladda Filimada	260.000 1.500.000 1.350.000 150.000 579.000	— 110.000 — 100.000 — 50.000 — 50.000 50.000	150.000 1.400.000 1.300.000 100.000 529.000
1.17.0 Wasaaradda Waxba- rashada	1.2.1 (i) 1.2.2 (x) 3.1.1	Qalabka waxbarashada Guri iyo xafiis bilid Dhismaha cusub	5.700.000 210.000 3.000.000	+1.000.000 +2.150.000 +4.850.000	6.700.000 2.360.000 7.850.000
		Isugeyn	8.910.000	+8.000.000	16.910.000
		Isugeyn	61.590.232	—8.000.000	53.590.232

SHARCI L. 35, Tr. 21 Maarso 1975.  
Mashruuca Horumarinta Beeraha Balcad.

MAXDAWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo  
ka Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Gaybta I.

HORDHIG

Qodobka 1aad

*Dhismaha mashuurca*

1. Mashruuca Horumarinta Beeraha Balcad imminka wixii ka dambeeya lagu magacaabi doona «Mashruuca» ayaa halkaan lagu dhisay.
2. Mashruucu wuxuu yahay mid madax banaan oo awaad iyo jirid' qaanuuni ah.

Qodobka 2aad

1. Ilaalinta Guud ee Mashruuca waxa yeelan doona, Xoghayaha Wasaaradda Beeraha oo imminka wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono Xoghayaha.
2. Xoghayahu wuxuu awood u leeyahay inuu tusaalooyin siiyo mashruuca isagoon haggaaan danaha guud ee Dawladda.

Qaybta II.

HABKA GUUD

Qodobka 3aad

*Ujeedooyinka Mashruuca*

Ujeedooyinka Mashruuca waxay yihiin:

1. Horumarinta dhulka Dawladdu siisay Mashruuca.
2. Soo saaridda iyo diyaarinta tacabka Beeraha.
3. Inuu ka ijaaro dhulka, qalabka iyo aqoonlayda beeraha, beeralayda dhulka ay Dawladdu siisay Mashruuca.

4. Soo saaridda midhaha Beeraha iyo gadidooda.
5. Horumarinta waraabinta Beeraha Balcad iyo hawlaha la xiriira.

Qodobka 4aad

*Xarunta Mashruuca*

Xarunta Mashruuca waxay ahaan doonta Balcad oo ku yaal Gobolka Shabeelada Dhexe.

Qodobka 5aad

*Awooda*

Mashruucu wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo ujeedooyinka ku xusan qodobka 3aad ee Sharcigan.

Qaybta III.

DHISMAHA MASHRUUCA

Qodobka 6aad

*Xubnaha Mashruuca*

Xubnaha Mashruuca waxay ka kooban yihiin:

1. Maareeyaha Guud.
2. Waaxda Beeraha.
3. Waada Waraabinta.
4. Waada Maamulka.

Qodobka 7aad

*Magacaabidda Xubnaha Mashruuca*

Maareeyaha Guud, iyo madaxda waayada Mashruuca waxa lagu Magacaabi doonaa Xeerka Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaaya ra'aiga Xoghayaha.

Qodobka 8aad

*Xuquuqda Dhaqaalaha*

Xuquuqda dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha kale waxaa xukunmi doona, sharciga lamb. 36 ee 22kii Aprile 1972 iyo Xeerka M.G.S.K. Lam. 74 ee 22 Aprile 1972.

Qodobka 9aad

*Hawlaha Maareeyaha Guud*

Maareeyaha Guud wuxuu ahaan doonaa madaxa fulinta ee Mash-

ruuca, waxaa xilsaaray maamulka Guud iyo fulinta ujeedooyinka Mashruuca, mas'uuliyadda lacagta Mashruuca iyo inuu si habsami ah u maamulo xisaabaadka Mashruuca sida ay farayaan habka iyo qawaaniinta Dawladdu.

#### Qodobka 10aad

##### *Shaqaayaha*

1. «Mashruuca» wuxuu qoran karaa shaqaalaha uu u baadan yahay iyadoo la raacayo sharciga shaqo qoridda.

2. Shuruudda shaqada ee shaqaalaha Mashruuca waxa xukumaya sharcigan iyo qaawaaniinta faahfaahsan (regulation) ee sharcigan la xi-dhiidha; iyo sharciyada ku xusan qod. 8 ee sharcigan.

#### Qaybta IV.

### QODOBBADA MAAMULKA LACAGTA

#### Qodobka 11aad

##### *Raasumaalka Mashruuca*

Raasumaalka «Mashruuca» wuxuu ka kooban yahay:

1. Qiimaha 10.000 ee Hiktar oo dhul ah kuna yaal shabeellada Dhexe oo Dawladdu siin doonto.
2. Wixii lacag ah oo ka soo gala hawsha uu «Mashruuca» qabto.
3. Hantida dhaqdhaqaaqa leh iyo taan leheen ee «Mashruuca» iyo wixii lacag ah ee ka soo baxa ijaarkooda.
4. Wixii hanti ah ee Dawladda iyo Ururrada Caalamiga ahi ugu deeqaan «Mashruuca».
5. Wixii lacag ee keyd ah «Reserve Fund» ee sannad kasta laga dhig macaashka «Mashruuca».
6. Wixii hanti ee deeq ama si kale u soo gala «Mashruuca».

#### Qodobka 12aad

##### *Misaaniyadda*

Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Settember ama inta ka horeeysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda sannadka maliyadda soo geliya isagoo faahfaahinaya kuna muujinaaya bandhigga miisaariyadda lacagta soo geli doonta iyo tah ka bixi doonta Mashruuca sannadka soo socda; waxaa hordhigi doonaa si loo oggolaado «Wasaaradda Beeraha iyo Wasaaradda Maaliyadda».

Qodobka 13aad

*Xisaabaadka sannadka*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31ka Marso ama inta ka horreysa sannadka kasta waa inuu diyaariyo, iskuna soo dubbariddaa xisaabaadka sannadka iyo bandhiggii macaashka iyo kharashka Mashruuca ee sannadkii Maaliyadda ee hore, isla markasna u gudbiyaa «Wasaaradda» iyo Wasaaradda Maaliyadda.

2. Xoghayuhu wuxuu awood u leeyahay isagoo tashanaaya Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda inuu oggolaado xisaabaadka sannadka, wuxuuna amar ku bixin doonaa in lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharjka uu bixinaayo «Mashruuca».

Qodobka 14aad

*Sannadka Maaliyadda*

Sannadka Maaliyadda ee «Mashruuca» wuxuu bilaabmayaa 1da Jennaayo wuxuuna dhammaanayaa 31ka Dicembar ee sannad kasta.

Qodobka 15aad

*Amaahda*

«Mashruuca, isagoo haysta guddoonka Xoghayaha Wasaaradda Beeraha, wuxuu awood u leeyahay inuu amaahdo lacag xarumaha lacagta (financial institutions) ee dalka iyo dibeddaba si uu u hirgeliyo xilka la saaray ama ujeedooyinka «Mashruuca».

Qodobka 16aad

*Baadhidda Xisaabaadka*

Xisaabaadka «Mashruuca» waxaa baadhi doona Hantidhowrka Guud.

Qodobka 17aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka Lacagta ee «Mashruuca» waxaa xukumaya; laguna maamulayaa habka ay tilmaamayaan Sharciyada Dawladdu iyo Qawaaniinta faahfaahsan ee la xidhiidha.

Qaybta V.

QODDOBADDA XIDHITAANKA

Qodobka 18aad

*Guddoominta Qawaaniinta Faahfaahsan*

Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaaya talada «Xoghayaha» inuu soo saro qawaaniinta faahfaahsan si loo hirgeliyo Qodobadda Sharcigan.

Qodobka 19aad

*Burin*

Sharci ama Xeer kasta oo ka duwan ama ka hor imaanaya sharcigan waa la baaba'shay.

Qodobka 20aad

*Dhaqan Gelid*

1. Sharcigan hor ayuu ka dhaqan gelayaa.
2. Sharcigani wuxuu ka mid noqon doonaa sharciyada rasmiga ah iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqradiga ee Soomaaliya, waxana lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2 Abril 1975.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*

LAW L. 35 Tr. 2 Abril 1975.  
Balad Irrigation Development.

THE PRESIDENT  
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

TAKING NOTE Of the joint approval of the Supreme Revolutionary Council and the Council of Secretaries;

HEREBY PROMULGATES

The following law:

Chapter I.  
PRELIMINARY

Art. 1

«Balad Irrigation Development» project, hereinafter, referred to as the «Project» is hereby established. The Project shall be autonomous body with a juridical entity.

Art. 2

The Project shall function under the supervision of the Ministry of Agriculture, hereinafter referred to as «the Ministry».

The Secretary of State for agriculture hereinafter referred to as the «Secretary» may give the project such directives as he may consider necessary from time to time in order to ensure that it acts in accordance with the best interests of the state.

Chapter II.  
GENERAL

Art. 3

*Scope, Objectives and Powers*

The scope and objectives of the project shall be as follows:

1. Development of land leased to it by the government;
2. Production of agricultural crops;
3. Processing of agricultural produce;
4. Marketing agricultural produce in raw or processed form.

5. Hire out agricultural land, machinery and technical know-how to lease-holders farming within land legally leased by the government to the project.

Art. 4

*Head Office*

1. The Head Office of the Project shall be in Balad in the Central Shebelle Region.

Art. 5

*Power*

The Project shall have all the powers necessary for the achievement of its objectives referred to in article 3 of this law.

Chapter III.

ORGANISATION THE ORGANS OF THE PROJECT

Art. 6

The Organs of the project shall be as follows:

1. The General Manager.
2. The Agricultural Manager.
3. The Irrigation Manager.
4. The Administration Manager.

Art. 7

*Appointment of the Organs of the Project*

The General Manager, Agricultural Manager, Irrigation Manager and Administration Manager shall be appointed by decree of the President of the Supreme Revolutionary Council on the proposal of the «Secretary».

Art. 8

*Emoluments*

The emoluments of the General Manager and Managers shall be established by decree of the President of the Supreme Revolutionary Council on the proposal of the «Secretary».



Art. 9

*The function of the General Manager*

The General Manager shall be the executive head of the Project. He shall be responsible for the general direction and fulfilment of its objectives as well as the funds of the project and the proper maintenance of its accounts in accordance with the state financial regulations and procedure.

Art. 10

*Staff*

The project may appoint the staff required by it other than those mentioned in article 6 of this law and shall establish their emoluments.

The terms and conditions of service of the staff shall be governed by this law and regulations issued thereunder and shall also be subject to the provisions of law No. 36 of 22 April 1972. (Law on Autonomous Agencies and the regulations made thereunder).

Chapter IV.

FINANCIAL PROVISIONS

Art. 11

*Capital*

The Capital of the project shall consist of:

- a) the value of 10.000 hectares of the land at Central Shebelle to granted by the government.
- b) any revenue derived from its activities;
- c) all movable and immovable properties of the project and rentals therefrom;
- d) any contribution which may be granted by the State, public bodies and International organisations.
- e) reserve funds to be set aside from «the Project's» yearly profits.
- f) any other receipts.

Art. 12

*Budget*

The General Manager shall not later than 30th September each year prepare a budget statement for the next financial year, showing the estimated receipts and expenditure of the project this 1971-1972 financial

forthwith to the Ministry of Agriculture and the Ministry of finance for approval.

Art. 13

*Annual Accounts*

1. Within 31st March in each year, the General Manager shall prepare the annual accounts and profit and loss statement of the «Project» and shall submit the same to the «Ministry» and Ministry of Finance.

2. «The Secretary» shall, in consultation with the Secretary of State for Finance, be competent to approve the Annual Accounts and shall give instructions for their publication in the Official Buletin at the expenses of «the Project».

Art. 14

*Financil Year*

The financial year of the project shall commence on the 1st Jenauary and end on 31st December every year.

Art. 15

*Authorised Loans*

The project may, for the purpose of its activity, obtain loans from financial Institutions within the Republic and abroad with the approval of the «Secretary of State for Agriculture».

Art. 16

*Audit*

The accounts of the project shall be audited by the Magistrate of Accounts.

Art. 17

*Accounts*

The accounts of the project shall be maintained in the manner prescribed by the General rules issued by the Government for that purpose and by any regulations issued thereunder.

Chapter V.  
FINAL PROVISIONS

Art. 18

*Regulations of the Project*

The President of the Supreme Revolutionary Council may, on the proposal of the «Secretary» by decree issue regulations for the proper implementation of this Law.

Art. 19

*Repeal*

Any law or provision contrary to or inconsistent with the provisions of this law is hereby repealed.

Art. 20

*Coming into force*

1. This law shall come into force immediately.
2. It shall be included in the Official Compilation of law and Decree of the Somali Democratic Republic and shall be published in the Official Buletin.

Muqdisho, 2 April 1975.

THE PRESIDENT  
of the Supreme Revolutionary Council  
*Major Gen. Mohamed Siyad Barre*

## BOGGA LABAAD XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 4 Maarso 1975, L. 67.

Dalacsiin la siiyey Xiddiglayaal.

### GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashidii Kowaad iyo tii labaad ee Ka-caanka;

ANNAGOO ARAGNAY Sharciga lambarkiisu yaha 1 taariikh 21kii Oktoobar, 1969;

ANNAGOO ARGNAY Sharciga Xabsiyada ee lambarkiisu yahay 7, taariikh 30kii Disembar, 1971;

ANNAGOO ARAGNAY Sharciga lambarkiisu yahay 14 taariikh 3dii Juunyo 1962, qodobka 7aad ee Habka Dawladda;

ANNAGOO ARAGNAY Caddeynta Taliyaha Ciidamada Asluubta;  
SOO JEEDINTA Xoghayaha Dawladda, Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Dinta;

#### Qodobka 1aad

Laga bilaabo 1da Abriil, 1975 Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin oo tababar Sarkaalnimna ku soo qaatay Jamhuuriyada Dimoqradiga ee Jarmalka iyo Soomaaliyaba waxa loo dalacsiyey Xiddiglayaal ka tirsan Ciidamada Asluubta ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya:

1. Maxamud Ismaaciil Xuseen
2. Maxamed Xirsi Maxamud
3. Yuusuf Cabdi Aadan
4. Aadan Axmed Rooble
5. Cumar Siidow Rooble
6. Cali Xirsi Daahir
7. Ibraahim Cali Aadan
8. Axmed Maxamed Aadan
9. Ibraahim Cabdiraxman Cali.

#### Qodobka 2aad

Mushaharkooda kordhay waxaa laga bixin doonaa 1.5.1. Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Dinta — 1.5.2. - 1.1.1. Mushar — Taliska Ciidanka Asluubta.

Muqdisho, 4 Maarso 1975.

GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda  
Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Dinta

**XEER WASAARADDA GANACSIGA**

Tr. 23 Maarso 1975, L. 68.

Qiimaha Timirta.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

MARKII UU ARKAY Go'aankii 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKII UU ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 17ka oo soo bayxay 17-6-1967, ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maarmaan ah;

MARKII UU ARKAY Xeerka sumadiisu tahay WGG-A-2B-131 ee 16-1-1975, kuna saabsana Sicirkii loo gooyay timirta;

MARKII UU TIXGELIYEEY Inay tahay lagama maarmaan in Waakaaladda Ganacsiga Ummadda toos uga gado timirta Dukaanleeyda;

Ayadoo la dhaqan gelinaaya go'aankii ay gaareen Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda:

**WUXUU DEJINAAYAA XEERKA SOO SOCDA**

**Qodobka 1aad**

Qiimaha timirta ay Wakaaladda Ganacsiga Ummadda toos uga gadayso Dukaanleeyda iyo qiimaha ay Dukaanleeyda kaga gadayaan Dadweynaha, waxay noqon doonaan sida aanu u goynay ee hoos ku qoran, laga billaabo 24 Maarso 1975:

<i>Badeecadda</i>	<i>Qiimaha ay WGU (ENC) kaga gadayso Dukaanleeyda kiiladii</i>	<i>Qiimaha ay Dukaanleeydii kaga gadayaan Dadweynaha kiiladii</i>
Timirta	Shs. So. 2.55	Shs. So. 3.00

**Qodobka 2aad**

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda; waxuuna tirayaa xeer kastoo ka soo horjeeda. Waxaa lagu amrayaa qof waliba inuu dhawro, dadka kalena dhowriyo xeerkan isaga ah.

Muqdisho, 23 Maarso 1975.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

*Jaalle Axmed M. Maxamuud*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY**

*Diiwaanka Lamb. 1, Bogga Lalmb. 64.*

*Muqdisho, 9 Abril 1975.*

*Hantidhawraha Guud*

*G. Dhexe Cabdilleahi Warsame N*

**XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMALIA**

Tr. 16 Abriil 1975, L. 69.

Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

Xeer Lambar 71 ee 16-04-1975.

**AGAASIMAHA GUUD**

**EE BANKIGA DHEXE EE SOOMALIYA**

MARKUU ARKAY Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar, 1964, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqanyahay Guddoomiyuhu.

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihiinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu mar walba caddeeyo qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciiciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaadii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysii-say Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 178 ee 16-04-75, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lr. 27 ee 26 Nofembar 1968 uu dhigayo.

**WUXUU GUDDOONSHAY**

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 16-04-75, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga Ah, Lacagaha Qalaad ee Soomaaliya.

<i>Lacagta galaad</i>	<i>Heerka iibsashada oo Sh. So. ah</i>	<i>Heerka gadidda oo Sh. So. ah</i>
US \$ 1.00	6.2327	6.3573
UK £ 1.00	14.7614	15.0567
DM. 1.00	2.6189	2.6713
LT. 102.04	1.0000	—
LT. 100.00	—	1.0000
F. FR. 1.00	1.4785	1.5081
SW. FR. 1.00	2.4313	2.4800
DJ. FR. 1.00	0.03525	0.03596

Muqdisho, 15 Abriil 1975.

Agaasimaha Guud Guddoomiyaha K.M.G.  
SACIID MAXAMED CALI

**KEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

Tr. 30 Maarso 1975, L. 70.

Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Jamiila Cali Bin Cali, kuna yaal Baydhabo.

**XOGHAYAHA HAWLAHA**

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 50 soona baxay 26 Gennaio 1964;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Ibrahim Macallin Muuse taarikhdu markay ahayd 16-5-1964 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Baydhabo;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Guddoomiyaha Baydhabo, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 24 soona baxaday 12-12-1973, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda ku saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Wasaaradda Hawlaha Guud — Waaxda Farsamada dhulka taarikhdeeduna ahayd 8-11-1973 kuna saabsaneed dhismo curi.

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 114240 ee 8-11-1973 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Ibrahim Macallim Muuse uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 330, kuna saabsan

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhila mq. 330, loona tiriyay Ibrahim Macallim Muuse sida ku cad xaashid ay qorqiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

tay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 19-10-1974;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Baydhabo; taariikhdeeduna ahayd 26-1-1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay waafaqsan tahay gufiga;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Baydhabo, laguna siiyay xaashid lamb. 1062-74 ee 21-12-1974, kana soo baxday Xafiiska Caafimaadka Guud Gobolka Bay, taas oo caddeyneysa in gurga wanaagsan yahay;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo nashadda oo tiilmameysa dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 87 Reb. taariikh. 7 12-68 lagu diiwaan geliyay Baydhabo 9-12-1968, qoraal Dowladeed oo ah Caddeynta Garsooraha Axmed Xaaji Maxamed Cismaan taas oo Ibrahim Macallim Muuse ka gatay kuna wareejiyay Jamiila Cali Bin Cali wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul kuna yaal Baydhabo;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilita) oo ay ujeeddaddisu ahayd dhis, wuxuu soo saaraya;

## X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Jamiila Cali Bin Cali, dhul ku fadhiga mq. 330, kuna yaal Magaaladda Baydhabo.

Muqdisho, 30 Maarso 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud  
Inj. Maxamed Xawaale Muhtar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 7.

Muqdisho, 12 Abriil 1975.

Hantidhawraha Guud

C. Dhoro Cabdillahi Warsame Nuur



## BOGGA SADDEXAAD

TALOOPYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Amina Sheekh Xusen, maalintii 21-7-1973, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada 21ka Oktoobar, Jidka 21ka Oktoobar uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rettangolar, addimihiisuna ahaayeen 20x30, kuna fadhiye 400 mdh., sababtoo ah in Qorshihii Xaafudda Iskabedelka.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa W.H.G. 3-23-930, kana baxaday xafiiskaan, waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Rettangolar, addimihiisu yihiin 30x20 kuna wadhiya 600 soohdimihii-suna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. Yahay 35.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. Yahay 42.

Muqdisho, 12 Abriil 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(68)

*Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Warsama Rooble iyo Cali Jiisow Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27-11-1959, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna fadhiya 34x20,30 = 690,20 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Jid.

Koofur Xasan Hirawe Dhiblaawe.

Galbeed Jd.

Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Abriil 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(69)

*Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Uluma Xasan Moxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 7-12-1966, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas Rettangolar, kuna fadhiya  $204 \times 6 = 920$  mdh.

Soohdin:

Waqooyi Dhul Dad leeyahay.

Koofur Looto Lamb. 7 iyo 3.

Galbeed Jdd.

Bari Wadada Balcad.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Abriil 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

(70)

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Axmed Maxamed Ibrahim, maalintii 12-5-1968, loona ogolaadal oo ku yiil Muqdisho degmada V Km. Jidka Muq. Afg. uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rettangolar; addimihiiisuna ahaayeen  $60 \times 50$ , kuna fadhiye 3000 mdh., sababtoo ah Qoorshahii oo xaafadda oo isbedelay.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 431-1018 ee 14-8-1968, kana baxday xafiisnaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Rettangolar addimihiiisu yihiin  $40 \times 30$  kuna fadhiya 1200, soohdimihiiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Dhul dawladeed.

Muqdisho, 16 Abriil 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

(71)

**SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI — SOPRAL — S.p.A.**

Sede in Mogadiscio — Capitale Shs. So. 1.000.000,00

---

## A V V I S O

### DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Prodotti Alimentari — SOPRAL — S.p.A., con sede in Mogadiscio, sono convocati in Assemblea Ordinaria, presso la Sede Sociale, per il giorno 19 Maggio 1975 alle ore 11 in prima convocazione e, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 26 Maggio 1975 alla stessa ora enello stesso luogo per deliberare sul seguente:

#### ORDINE DEL GIORNO

1. Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. Presentazione Bilancio e Conto Perdite & Profitti al 31 Dicembre 1974 e deliberazioni relative;
3. Nomina del Collegio Sindacale.

Hanno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro tale termine abbiano depositato le loro azioni presso la sede Sociale o presso un Istituto Bancario n Mogadiscio.

Mogadiscio, li29 Aprile 1975.

#### IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

(72)

---

**WESAARDDA KIIMIKADA SOOMAALIYED — I.C.S. — S.p.A.**

---

#### OGEYSIIS SHIR

Waxaa la ogeysiinayaa saamileyda Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (I.C.S. - S.p.A.) in uu jiro fadhi caadi ah oo lagu dhigi doono saldhigga Warshadda ee Muqdisho maalinta bishu ay tahay 15-6-1975 saacaddu markay tahay 4.30 galabnimo, hadduu shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Juunyo maalinta ay tahay 22 isku saacadda kor ku qoran.

Shirkaa assaga ah waxaa lagaga hadli doonaa arrimaha hoos ku yaalla:

1. Faaiidii Guddiga Maamulka sannadkii 1974.
2. Faaiidii Guddiga Baaridda Maamulka sannadkii 1974.
3. Dhellitirka xisaabaadkii sannadkii 1974.
4. Wixii kale ee yimaada.

Muqdisho, 30 Abriil 1975.

GUDDIGA MAAMULKA

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

Hadduu arkay dacwada hor ku qotan;  
Markuu arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga Ga-  
nacsiga Soomaaliyeed, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;  
Hadduu arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

**WUXUU CADEYNAYAA**

Lumidda buuga (Ammortamento libretto) NDR. 96-4 ee Shs. 502 ku  
qoran tahay;

**WUXUU AMRAYAA**

In loo sameeyo, ninka magaciisa la yiraahdo Cabdillaahi Ismaaciil  
Jaamac, muddo 30 beri ka dib, laga bilaabo maalinta lagu shaaciyo Faa-  
finta Rasmiga ah ee Dawladda, buug lacageed; haddi cid kale ayan wax  
ku sheegan.

**WAXAA LA CODSANAYAA**

Oo kale in ninka magaciisu kor ku yaal gacanta laga saaro buuggaas,  
ama nin wakaalad sharci ah ka sita, ayadoo la sugaayo muddada 30ka  
beri ah ee kor lagu soo sheegay.

Xamar, 4 Maajo 1975.

**GARSOORAHA MAXKAMADDA**  
*Dr. Yasiin Shire Faarax*

(74)

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

Haddu arkay dacwada hor ku qoran;  
Markuu arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiski Bankiga Ga-  
nacsiga Soomaaliyeed, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;  
Hadduu arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

**WUXUU CADEYNAYAA**

Lumidda buugga lacagta (Ammortamento libretto) NDR. 6478-4 ee  
Shs. 3.000, ku qoran tahay;

**WAXAAN AMRAYAA**

In loo sameeyo ninka la yiraahdo Xuseen Shire Jimcaale muddo 30  
beri ka dib laga bilaabo maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ee  
Dawladda, haddii cid kale ayan wax ku soo sheegan, buug lacageed;

**WAXAA LA CODSANAYAA**

Oo kale in buugga lacagta laga saaro gacanta ninka magaciisu kor  
ku qoran yahay ama qof ka sita wakaalad sharci ah; ayadoo la sugaayo  
30ka beri ee kor laga soo sheegay.

Muqdisho, 1 Maajio 1975.

**GARSOORAHA MAXKAMADDA**  
*Dr. Yaasiin Shire Faarax*

(75)